



# Caymiska Uurka-Kadib (APC)

Caymiska Uurka-Kadib (APC) ee Apple Health (Medicaid) ayaa bixiya adeegyo lagu taageerayo wanaagga caafimaadka maskaxda, jirka, iyo dareenka ee loogu talagalay 12 bilood ka-dib uurka.

## Dheefaha iyo adeegyada

APC waxay bixisaa daryeelka la socoshada dhalmada ka-dib waxayna bixisaa adeegyada daryeel caafimaad oo dheeraad ah oo aanan wax lacag ah kugu fadhin. Dheefaha waxaa ka mid ah daryeelka ilkaha, ka hortagga uurka, daryeelka ka hortagga ah, caafimaadka hab-dhaqanka, iyo adeegyo kale oo uu caymiyey Apple Health. Haddii aad xaq u leedahay, caymiska wuxuu soconayaa ilaa 12 bilood ka-dib marka uu dhammaado uurkaaga iyadoon la eegin isbeddel ku yimaada dakhliga.

Booqo [hca.wa.gov/apple-health-services](https://hca.wa.gov/apple-health-services) si aad u oggaato adeegyada lagu caymiyay Apple Health.

## Miyaan xaq u leeyahay?

Si aad xaq ugu yeelato barnaamijka APC waa in:

- Aad uur lahayd 12kii bilood ee ugu dambeeyay gudahooda.
- Aad deggan tahay gobolka Washington.
- Aad leedahay dakhli bille ah oo daboola jaangooyooyinka lagu taxay xagga gadaale.
- Aadan xaq u lahayn barnaamij kale oo ka mid ah Apple Health.

Xaaladda socdaalka ma saameynayso xaq-uyeelashada. Wax badan ka ogow [hca.wa.gov/apc](https://hca.wa.gov/apc).



## Waa maxay inta ugu badan ee aan bil kasta sameyn karo si aan ugu qalmo?

Qofka keligiisa ah	Qoyska ka kooban 2-qof	Qoyska ka kooban 3-qof
\$2,804 bil kasta	\$3,790 bil kasta	\$4,775 bil kasta
Qoyska ka kooban 4-qof	Qoyska ka kooban 5-qof	Qoyska ka kooban 6-qof
\$5,760 bil kasta	\$6,747 bil kasta	\$7,731 bil kasta

## Miyaad uur leedahay oo aadna hore u lahayd caymiska Apple Health?

Haddii aad horey u lahayd caymiska Apple Health, waxaad u wareegi doontaa APC marka aad cusboonaysiiso xaaladda uurkaaga.

- Haddii aad leedahay caymis loo marayo Washington Healthplanfinder, isbeddellada ka samee [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org).
- Haddii uu ku caymiyey Apple Health Classic Medicaid (oo ay da'daaduna tahay 65 ama ka weyn, aadna tahay indhoole ama naafo) isbeddellada ka samee [washingtonconnection.org](http://washingtonconnection.org).

## Miyaad uur lahayd 12kii bilood ee ugu dambeeyay adiga oo aadan lahayn caymiska Apple Health?

Waxaad xaq u yeellan kartaa APC. Codso hadda!

- Online-ka: Booqo [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org) - dooro batoonka "Codso Hadda/Apply Now".
- App-ka telefoonka gacanta: Soo-degso app-ka WAPlanfinder.
- Telefoonka: Ka wac Washington Healthplanfinder lambarkan 1-855-923-4633.
- Warqad: Ka soo-degto barnaamijka lambarkan [hca.wa.gov/health-care-application](http://hca.wa.gov/health-care-application).
- Shakhsi-ahaan: Kheyraadka degaanka kaasoo, iyadoon lagaa qaadin kharash dheeri ah, ku caawin kara in aad codsato caymis caafimaad.
  - o [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org) - Hel hage iyadoo loo marayo linki-ga taageerada macmiilka.



Haddii aad u baahan tahay diyaafadin, ama aad u baahan tahay dokumentiyo qaab kale ah ama ku qoran luuqad kale, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711)